



# GOLAHIA WAKIILADA SOMALILAND SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES



## Warbixinta

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 37<sup>aad</sup>**

*(07 July 2018 illaa 08 September 2018)*

*November 2018*

## *Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL*

*Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 37aad*

### Kal-fadhigii 37aad

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	37aad	07/07/2018	08/09/2018

*Mudanayaal,*

Si aynu u gudano hawlaho inoo qorshaysan *kal-fadhiga 38aad* ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanya Waajibaadkeena Qaran, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhigii 37aad oo dhamaystiran si aad u xasuuusataan waxyaabihii inoo qabsoomay iyo wixii inaga baaqday ee inoogu qorshaysnaa ajandahaas hore.

Kal-fadhigii 37aad ee Golaha waxa u qabsoomay waxyaabo badan oo aad u muhiima kuwaas oo ay ugu waynayeen Ansixintii 10 Mashruuc Sharci oo ay ka dhaqangaleen 7 Xeer oo ka mid ahi, Ansixnta Masuuliyiin Qaran iyo Waxyaabihii Gudiyadda iyo Maamulka Golahaba u qabsoomay si aynu u dardargalino shaqada inoo qorshan *kal-fadhigan 38aad*.

### Warbixinada Golaha laga hor akhriyay

Tar.	Warbixinta	Cid akhridey
15/07/2018	Warbixintii Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 37aad.	Mr. Cabdirisaq Siciid Ayaanle Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada.
15/07/2018	Warbixinta Gudidda Joogtada	Md. Axmed Ducaale Bulaale Gudoomiye ku-xigeenka Gudida
31/07/2018	Warbixinta Xisaab Xidhkii Miisaaniyadii 2016kii	Md. Naasir X. Cali Shire Gudoomiyaha Gudiddaaa

### Xeerarka uu Goluhu Ansixiyay

#### A. Xeerarka Guurtida U gudubtay

No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	Halka loo gudbiyay
----	--------------------------------	------------	--------------------

1.	Xeerka Maaraynta Qashinka iyo Fayadhowrka Magaaloooyinka	11/08/2018	Golaha Guurtida
2.	Xeerka Kalluumaysiga	27/08/2018	Golaha Guurtida
3.	Xeerka Ciidanka Illaalada Xeebaha	28/08/2018	Golaha Guurtida

**B. Xeerarka M/weynaha u gudbay ee Dhaqangalay**


No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	U gudbay	Marxalada
1.	Xeerka Waxbarashada	23/07/2018	Madaxweynaha	Dhaqangal
2.	Xeerka Shirkadaha	24/07/2018	Madaxweynaha	Dhaqangal
3.	Xeerka Maaraynta Deegaanka	28/07/2018	Madaxweynaha	Dhaqangal
4.	Xeerka Kuksiga	29/07/2018	Madaxweynaha	Dhaqangal
5.	Xeerka Qandaraasyada	02/09/2018	Madaxweynaha	Dhaqangal
6.	Xeerka Kalluumaysiga	08/09/2018	Madaxweynaha	Dhaqangal

**Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay**

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Maxamed Baaruud Cali	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	30/07/2018
2.	Rooda Axmed Yaasiin	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	30/07/2018
3.	Muuse Cismaan Warsame	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	30/07/2018
4.	Saleebaan Warsame Guuleed	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	30/07/2018
5.	Waris Abshir X. Diiriye	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	30/07/2018
6.	Cumar Maxamuud Xusseen	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	30/07/2018
7.	Cabdirashiid Siciid Cindi	Xubin Gudidda Xuquuqal Insaanka	30/07/2018

## Mudanayaasha Golaha oo saxeexay petition Ictiraaf Raadin ah

Waxa 08/09/2018 la horkeenay Petition lagu taageerayo Aqoonsiga iyo Gooni isu taaga Somaliland kaas oo Xildhibaanada Goluhu wada saxeexeen, petition-kaas oo loo dirayay Ururada Dawliga ah Sida Qaramada Midoobay, Ururka Midawga Afrika, IGAD, Jaamacada Carabta iyo Dawladaha daneeya qadiyada Somaliland, waxaana lagu muujinayay sida Somaliland caalamka uga doonayso aqoonsi buuxa oo ay hesho isla markaana ay uga go'aday dalka Somaliya.



Petition-kaas oo Mudanayaasha Golaha Wakiiladu dhamaantood saxeexeen Shir-gudoonka Goluhu wuxuu si rasmiya ugu gudbiyay dhamaan Ururada iyo Dawladaha kala duwan ee uu khuseeyay.

## Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah

### **A. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan:-**

No.	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Xawaaladaha	Gudidda Dhaqaalaha
2.	Xeerka Dhaqaalaha Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha
3.	Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
4.	Xeerka Macdanta	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
5.	Wax ka badalka Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
6.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
7.	Wax ka badalka Xeerka Doorashada Guud iyo D/galinta	Gudidda Arrimaha Gudaha
8.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
9.	Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Gudidda hawlahaa Guud iyo Gaadiidka
10.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
11.	Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
12.	Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
13.	Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka	Gudidda Joogtada iyo Anshaxa
14.	Wax ka badalka Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka	Gudidda Arrimaha Gudaha
15.	Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada	Gudidda Arrimaha Gudaha

### **B. Xeerarka GoleWaynaha Horyaal:-**

16.	Xeerka Maydhista Lacagta	Akhriski labaad
17.	Wax ka badalka Xeerka Booliska	Golewaynaha
18.	Wax ka badalka Xeerka Tamarta	Golewaynaha

## Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.
4. Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta.
5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
6. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.
7. Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadjelyada.
8. Gudidda Sirdoonka iyo Nabadsugida.
9. Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.
10. Gudidda Hawlahaa Guud iyo Gaadiidka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha, iyada oo gudi wal u qaabilسان shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed, waxay golaha uga soo warbixiyaan Masuuliyyiinta la ansixiyo ee ay Xukuumadu soo magacawdo iyo Hay'adaha Madaxa Banaan, waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii iyo masuuliyyintii ay ka soo talo bixiyeen Ansixintooda.

### **Guddida Joogtada iyo Anshaxa.**

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawla Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro.

Guddida Joogtada iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee xil-gudashada hawla qaran, iyadoo ka duulaysa muhiimada ay leeyihiin hawla qaran ee ay u hayaan wasaaradaha iyo hay'adaha madax-banaani ee dawlada, Waxa ay mudanayaasha Guddida Joogtadu kulamo xog-waraysi la yeeshen warbixino kala duwana ka dhagaysteen masuuliyyinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka qaar ka mida.

#### **Waxay kulamo Xog-waraysi Guddidu la yeelatay: -**

- Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada **24/09/2018**
- Wasiirka Horumarinta Beeraha **25/09/2028**
- Wasiirka Wasaarada Shaqo-Galinta, Arrimaha Bulshada Iyo Qoyska **06/10/2018**
- Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada **06/10/2018**

Waxa ay mudanayaasha Guddida Joogtadu kulamo xog-waraysi la yeeshen warbixino kala duwana ka dhagaysteen Masuuliyyinta Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka qaar ka mida oo ay **Kormeer Ugu Baxday Gobolka Saaxil Ee Berbera Fasaxa Kal-Fadhigan 37<sup>aad</sup> Ee Golaha Wakiilada.**

#### **Waxay la Kulantay Guddidu Masuuliyyiintan: -**

- Badhasaabka Gobolka Saaxil **13/10/2018**
- Maayorka Berbera **13/10/2018**
- Maareeyaha Dekeda Berbera **14/10/2018**
- Maareeyaha Haamaha Shidaalka ee Berbera **15/10/2018**

### **Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.**

**19 July 2018** Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Golaha wakiilada JSL ayaa Kulan Xogwaraysi ah la yeeshay Maareeyaha Wakaallada Biyaha Hargeysa **Md. Maxamed Cali Daarood** oo ay wehelinayaan Madaxda kala duwan ee wakaalada biyaha Hargeysa. Maaryeeha ayaa Gudida uga xog waramay Shaqada uu qaranka u hayo gaar ahaana mashaariicda la xidhiidha biyo-ballaadhinta Caasimada iyo sababta keentay in la kordhiyo qiimaha biyaha.



Maareeyaha wakaalada biyaha iyo Gudida dhaqaalaha ayaa markii kulankoodu dhamaaday waxay si gaara kulan ula qaateen shirgudoonka Golaha wakiilada.

15/10/2018 Gudidda Dhaqaaluhu waxay kulan la qaadatay **Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Md. Yusuf Maxamed Cabdi kulankaas** oo Gudidda Wasiirku kaga wada-hadlayeen arrimaha Miisaaniyada 2018ka halkay marayso iyo in Gudiddu kormeer ku tagaysay Illaha Dakhliga Gobolada Dalka, sidoo kale waxay Gudidda Wasiirka ka wada hadleen Diyaarinta Miisaaniyada Sanad Maaliyadeedka 2019ka iyo halkay Wasaaradda u marayso.

Gudidda Dhaqaaluhu **22/10/2018** waxay Safar ku soo martay Illa dakhliga Gobolada Saaxil, Tog-dheer, Awdal iyo Degmada Gabilay waxayna safarkaas ugu kuurgalaysay sida hawlaho dakhli ururinta ee Kastamada iyo Cashuuraha Bariga Goboladaas u shaqaynayaan iyo inay dakhligii lagu odorosay Miisaaniyadu uu soo xeerooday iyo wax iska badalay odoroskii.

### **Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.**

Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ahi waxay Golaha u soo gudbisay **Xeerka Maaraynta Qashinka iyo Faya-dhowrka Magaaloooyinka**, ka markii ay ka soo shaqaysay Xeerkaas, isla markaa Warbixintii iyo wax ka badalkiisa ayuu Gudoomiyaha Gudiddu Golaha ka hor akhriyay, Xeerkaas oo ugu dambeyn Goluhu Ansixiyay.

### **Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada.**

Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Difaacu ahi waxay Golaha u soo gudbisay **Xeerka Ciidanka Illaalada Xeebaha**, ka markii ay ka soo shaqaysay Xeerkaas, isla markaa Warbixintii iyo wax ka badalkiisa ayuu Gudoomiyaha Gudiddu Golaha ka hor akhriyay, Xeerkaas oo ugu dambeyn Goluhu Ansixiyay.

**15/08/2017** Gudidda arrimaha Guddaha iyo Nabadgalyada ee Golaha Wakiillada waxa ay kulan la qaadartay Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga iyo taliyaha Ciidanka Qaranka. Kulan ka oo ka dhacay Xafiiska Guddida, kulankan oo.u jeedadiisu ahayd xogwaraysi xaaldada nabadgalyo daro ee ka soo kordhay Bariga iyo dagaaladii ka dhacay Tuko Raq iyo dhexdhedaadintii la.waday. Sidoo kale kulanka waxa lagaga wada hadalay xeerka Hawlgalba Ciidanka iyo Xaqsiintooda ay dawladu soo gudbisay kasoo gudidu gacanta ku hayso sidi looga wada shaqayn lahaa. Gobogabodii kulankasi waxa u ku so dhamaday si wanaagsan Xogtii gudidu uga bahaanayd way ka heshay.

**21/10/2018** Gudidda Arrimaha Guddaha iyo Difaaca ee Golaha Wakiillada waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo taliyaha Ciidanka Boolisaka. Kulankaas oo ka qabsoomay Xafiiska Guddida ee Xarunta Golaha. Ujeedada Kulan oo ahayd is xogwaraysi xaaldada nabadgalyada ee dalka iyo Heshiisyadii dagaaladii ka dhacay Ceel awfayn iyo laascaanod iyo siday u soo dhameeyan. Sidoo kale kulanka waxa lagaga wada hadalay xeerar ay dawladu soo gudbisay oo gudidu hayso sidi looga wada shaqayn lahaa. Ugu danbayntii kulankasi waxa u ku so dhamaday si fiican Xogtii gudidu uga bahaanayd way ka heshay.

### **Gudidda Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka**

Bishii July 2018 Gudidda Garsoorka, Cadaaladda iyo Xuquuqal Insaanku waxay Golaha uga soo tallo-bixisay Ansixinta **Xubnaha Gudidda Xuquuqal Insaanka** oo 7 Xubnood ahaa kuwaas oo Goluhu markii dambe ansixiyay 30/07/2018

### **Tababaro iyo Aqoon korodsiyo.**

**16-17/10/2018** Waxaa Shaqaalahaa Hadal-qoraalka iyo Gudiyada ee labada aqal Baarlamaan (Guurtida iyo Wakiilada) loo qabtay Tababar socday labaas cisho oo ka qabsoomay Hotel Fish \$ Stick, waxaa lagu tababaray shaqaalahaa hab-qoraalka Baarlamaanka ee Fadhiyada iyo Kulamada Gudiyada, waxaana labadaas cisho lagu siiyay aqoon isugu jirta theory and practical sida loo qaado xogta laga hadlay oo qoraal looga dhigo ilaa nuqulada ugu dambeeya sida loo kaydgareeyo.

## Safarkii Gudoomiyaha Golaha ee Gobolka Sool

**Sidoo kale Bishii October 2018** Wefti uu hogaaminayo Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Somaliland Md. Baashe Maxamed Faarax ayaa Gobol Sool u tagay Xalinta Shaqaaqo iyo dagaal ka dhex taagnaa laba Beelood oo Gobolkaas isku diriray, waftigaas oo ka mid ahaayeen Wasiirka Arrimaha Gudaha Maxamed Kaahin Axmed, Wasiirka Wasaarada Waxbarashadda Iyo Sayniska Yaasiin X Maxamuud Xiir, Taliye Ku-xigeenka Ciidamada Bileyska Sareeye Guudto C/Raxmaan Liibaan (Foxle), Gudoomiyaha Gobolka Sool Cabdirashiid Xuseen Cabdulle Gargaar Wuxaanay Weftigaasi oo mudadii ay joogeen soo maray Magaaloooyinka Kalabaydh, Dhumay Iyo Dabataagta Kuwaasi oo ay Saameyn Laxaadle Gaadhsiiyeyn Colaadaha Sokeeye ee Dhexmaray Bulshada Walaalaha ah ee Wada Dega Deegaanadaasi.



Weftigu waxay kulano kala duwan la yeeshen cuqaasha iyo waxgaradka labada beelood, kulamadaasi oo lagu xoojinayay nabada iyo xasiloonida deegaanadaasi.

Ugu dambeyntiina waxay **10 October** halkaas laga soo saaray qodobo sal looga dhigayo nabad la isku halayn karo oo deegaanadaasi ka dhacda. Qodobadaasi oo ay ka mid ahaayeen.

1. In la kala raro maleeshiyaadka labada beelood,
2. In Xabad joojin rasmi ahi dhacdo iyo
3. In Wixii wadahadal ah la iskugu yimaado Magalada Laascanood.

Qodobaaasi ayaa gun-dhig u noqon doona geedi socod nabadeed oo laga gaadhi doono colaadaha sokeeye ee deegaanadaasi ku soo noqnoqday.

## Wufuudii Golaha Timid

19/07/2018 Waxaa Dalka yimi Wafti Xildhibaano ka socday Baarlamaanka Dalka Yugaandha watigaan oo ka koobnaa 4 Xildhibaan ayaa dalka lagu soo dhoweeyay, waxayna soo booqdeen Golaha Wakiilada iyagoo Kulan la yeeshay Gudoomiye ku-xigeenka 2<sup>aad</sup> **Dr. Cali Yuusuf** iyo koox Xildhibaano ah oo ka mid yahay Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada Md. Axmed Kijaandhe, Xildhibaanka Hogaaminayay Waftiga iyo Gudoomiyuhu ay kulanka ka dib wada-qabteen Shir-jaraa'id.



## Mudane ka geeriyooday AHN

No.	Mudanihii geeriyooday AHN	Taariikdii	Mudanaha badalay
1.	C/qaadir Askar Xasan	01/08/2018	Saleebaan Diiriye Barre

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

---